

GARTII INDHO DHEGO

Monday, 01 February 2010

Waxa qorey: Xassan Cabdi Madar

nabaadiino@yahoo.com

Waxa la weriyey sheekada Islaan u soo baxday baadidoonka riyaaheedii oo ka lumay. Waxay kolba dhinac u meeraysataba, waxay ugu dambayn ku soo baxday oday weyn oo jidka dhinaciisa shaah ku karsanaysa. Odaygu wuu dhego cuslaa, iyadoonse dareensanayn inuu dhega culus yahay ayey weydiisay:

“Ma aragtay riyo baadi ah?”

Odaygu wuxu moodayey inay weydiisay ceelkii biyaha oo dhinaca dooxa ayuu gacanta ugu fiiqay.

Islaantii intay u mahad naqday ayey xaggii dooxa u dhaqaaqday. Halkaas baanay si lama filaan ah uga heshay riyaaheedii.

Waxay heshay riyihii oo bedqaba waxar yar oo lug ka jabtay mooyee. Intay waxartii sinta ku soo qaaday ayey riyii soo kaxaysatay. Waxay soo ag martay odaygii kolkaasay is ag taagtay si ay uga mahadnaqdo riyaha uu u tilmaamay. Waxay abaal uga dhigtay inay siiso waxartii lugta ka jabtay.

Laakiin odaygan dhegaha culusi muu fahmayn waxa ay islaantu ku hadlayso, markii ay waxarta xaggiisa u soo fidsayna wuxu u qaatay inay leedahay adigaa iga jebiyey oo ay dacweynayso, aad baanu u xanaaqay.

“Anigu shaqo kuma lihi?” ayuu sare ugu dhawaaqay

“Laakiin adigaa ii tilmaamay meesha ay joogaan?” bay islaantii tidhi.

“Waa arrin riyaha oo dhan ku dhacda, aniguna shaqo kuma lihi?” ayuu haddana kor ugu qayliyey odaygii oo fiigsani.

“Waxan ka soo helay halkii aad iigu tilmaantay, waxanan doonayaa inaan waxartan abaal kuu siiyo?” bay tidhi islaantii.

“Ha i caayin, anigu waxaraha ma jebiyee?” ayuu ku dhawaaqay odaygii isagoo cadhaysan kolkaasuu islaantii dhirbaaxay. “Orodoo iga tag anigu weligay waxartaadan ma arage?” ayuu raaciyey.

“Ma arkaysaan inuu i dhirbaaxay, maxkamadda ayaan ka dacweynayaa?” bay islaantii dadkii ku soo xoomay ku tidhi.

Markaas ayaa islaantii oo waxartii laalaadinaysa, odaygii dhegoolaha ahaa, iyo dadkiiba garsoorihii ugu tageen maxkamadda.

Garsoorihii baa u soo baxay si uu cabashadooda u dhegaysto.

Ugu horrayn islaantii baa hadashay, kadibna odaygii, kadibna dadkii.. garsoorihii madaxa ayuu kor iyo hoos u ruxay. Laakiin hadalkan dadku macno uma samaynayn garsooraha oo sida odayga ayuu isna dhego cuslaa. Weliba aragga indhahana wuu ka liitay.

Ugu dambayn garsoorihii intuu hadalkii xidhay ayuu go'aankii garta dhiibay. Wuxu yidhi

“Dadkiinan xaasaska ahi inaad maxkamadda isa soo tubtaan ceeb bay ku tahay boqorka”. Wuxu ku jeedsaday odaygii oo ku yidhi, “immika laga bilaabo islaantaada ma dili kartid?”

Haddana islaantii waxarta gacanta ku haysay buu ku jeedsaday, “adiguna iska daa caajiska oo odaygaaga

cuntada ha kala habsaamin.”

Wuxu intaa raaciyey isagoo indho darraanta darteed waxarta moodayey ilmo yar, “Ilmahan yar ee aad wadataanna Ilaahay cimrigiisa ha dheereeyo oo ha ka dhigo kii idin anfaca”.

Dadkii oo fajac iyo anfareer ku dhacay oo caddaaladda garsooruhu yaab gelisay baa halkii ku kala dareeray